



# Kusoo dhawoow Dugsiga Mar kale 2020-2021

Waxbarashada Oonleenka ah




# Waxbarashada Oonleenka ah oo Lagu Bilaabaayo Sanad Dugsiyeedka Cusub!

Cedar Riverside Community School waxay ku faraxsan yihiin inay ardayda iyo qoysaska dib ugusoo dhaweeyaan dugsiya bisha Sibteembar! Sabab la xiriiirta dhibaatooyinka uu bulshada hadda ku haayo cudurka COVID-19, CRCS waxay bilaabaya sanad dugsiyeedka oo lagu dhigan doono oonleen fasalada PreK-8. Waxbarashada oonleenka ah ayaa aad uga duwanaan karta siday ahayd gu'gii lasoo dhaafay ayadoo dhammaan ardaydu heli doonaan qalabka casriga ah.

√	Dugsiya ayaa u bilaaban doona dhammaan ardayda maalinimada Salaasada ah, Sibteembar 8deeda
√	Dhammaan ardayda ku jira fasalada PreK - 8 ayaa heli doona qalabka casriga ah oo uu siinaayo dugsiya si ay ugu adeegsadaan waxbarashada inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-2021
√	Arday kasta wuxuu toos ula xariiri doonaa macalinka
√	Ardayda iyo waalidiinta ayaa filan kara jadwal lasoo koobay oo casharada iyo waxbarashada lagu hagaayo
√	Dhammaan shaqaalaha ayaa adeegsan doonaa nidaamka Class Dojo oo noqon doona isha ugu wayn ee wada xariirka iyo maaraynta
√	Fasal Cid kasta la qabsan karto ayaa noqon doona diirada xataa inta lagu jiro Waxbarashada Oonleenka ah
√	Macalimiinta ayaa casharada ku bixin doona nidaamka luuqada oonleenka/muwaadinimada ee dhammaan ardayda si loo xoojiyo badqabka iyo xogta sirta ah. Waalidiintu waxay heli doonaan isla xogta si ay u taageeraan ardaydooda
√	Taageero dheeraad ah ayaa la siin doonaa ardayda hela adeegyada gaarka ah iyo caawimaada ee dhinacyada akhriska, xisabata iyo caafimaadka dhimirka.

## Maxaa Loo doortay Waxbarashada Oonleenka ah?



Maalintii Khamiista, Agoosto 6, 2020 ayay maamulka Cedar Riverside Community School la kulmeen MN Department of Health (Waxda Caafimaadka ee MN) si loo qiimeeyo xaalada hadda ee COVID-19 ku hayo CRCS. Talada lasoo jeedshay ayaa ahayd in sanadka lagu bilaabo 2 bilood oo waxbarashada oonleenka ah. Waa kanaa qaabka la isku raacay:

- Nidaamka HVAC ayaa u baahan in qiimayn adag lagu sameeyo sabab la xariirta da'da iyo naqshada/qaab dhismeedka xarunta
- Reverside Plaza ayaa ah aag cajiib ah maadaama ay tahay mid kamid ah deegaannada ugu dadka badan deegaannada Minneapolis - tani waxay keenaysaa khatarta heerka isku gudbinta cudurka oo bulshada ku badan
- Waxaa jiro warbixino sheegaaya tiro dad badan oo ku dhaqan Riverside Plaza oon cudurkooda soo sheegayn taasoo keenaysa khatar wayn oo caabuqa ka dhalan karta.
- Xogta deegaanka ee gobalka io tan qaranka ayaa muujinaysa in COVID-19 uu si wayn u saameeyay deegaannada dadka aan cadaanka ahayn.
- Heerka caabuqa ka jira Degmada Hennepin ayaa wali sii koraayo asbuuc kasta
- Haddii dugsiyadu bilaabaan waxbarashada tooska ah isla markiibana dad badan uu cudurku soo rito waxbarashada waxaa saamayn wayn soo gaaraysaa muddo dheeraad ah sabab la xariirta xajmiga gaarka ah/goobta dugsiya.
- Minneapolis Public Schools (Dugsiyada Dadwaynaha ee Minneapolis) ayaa go'aansatay inay bilaabaan Waxbarashada Oonleenka ah

Inta sanadku socdo, CRCS waxay qiimayn doonaa marka ay amaan tahay in si tartiib ah loogu guuro waxbarashada tooska loo dhiganaayo dugsiya. Waxaan sii wadaynaa inaan gaarno go'aanadaan anagoo la tashanayna magaalada, gobalka, iyo saraakiisha federaalka. Hase yeeshee, si waalidiinta iyo shaqaaluhu u qorsheeyaan qaab taas waafaqsan, CRCS waxay ku dadaalaysaa waxbarashada oonleenka ah ilaa laga gaaro Jimcada, Nufeembar 6deeda, anagoo rajaynayna in ardayda qaar dugsiya kusoo laaban doonaa asbuuca Nufeembar 9keeda.

# Wajiyada Waxbarashada Amaanka ah ee CRCS

Wajiga 1	Wajiga 2	Wajiga 3	Wajiga 4
Waxbarashada Oonleenta ah kaliya	Waxbarashada isku dhafan - In lagu daro Ardayda Qaar oo Fasalka Toos u tagaaya	Waxbarashada iskudhafan - Dugsiga ayaa la furayaa, laakiin maalmo kooban ayaa la dhiganayaa	Waxbarashada toos loo dhiganaayo fasalka (maalinta oo dhan)
Waqtiga: Wuxuu soconayaa ilaa Jimcada, Nufeembar 6deeda si loogu sahlo qoysaska inay qorsheeyaan ardayduna u helaan joogtaynta waxbarashada	Waqtiga: Ardayda qaar ayaa ku laaban doona fasalka laga bilaabo Isniinta, Nufeembar 9keeda haddii ay amaan tahay in sidaas la sameeyo (xaalada ayaa si joogto ah loo qiimayn doonaa)	Waqtiga: Wali lama go'aamin	Waqtiga: Wali lama go'aamin
<ul style="list-style-type: none"> <li>Dhammaan casharada iyo taageerooyinka lagu baxsho qaabka oonleenta ah</li> <li>Dhammaan ardayda ayaa helay agabka casriga ah si ay wax ugu bartaan</li> <li>Isdhexgalka tooska ah ee macalimiintu oonleenta kula yeelanayaan ardayda</li> <li>Dhammaan shaqaalaha ayaa shaqayn doona ayagoo jooga guriga marka laga reebo shaqaalaha muhiimka ah qaarkood</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda ugu da'da yar ayaa bilaabaaya ku laabashada dugsiga - ayadoo inta badan lagu bari doono fasalo tirada ardaydu yartahay/qaab isbadbadalaaya</li> <li>Waxbarashada oonleenta ah ayaa loosii wadayaa dhammaan ardayda kale</li> <li>Qaar kamid ah ardayda waawayn oo u baahan taageerada dheeraadka ah sida caawimaada, ESL ama taageerooyinka kale iyo/ama adeegyada ayaa ku laaban kara nus kamid ah waqtiga dugsiga</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dhammaan ardayd ayaa ku laabanaysa fasalka ayadoo la raacayao jadwal isbadalaaya 2-3 maalmood asbuucii ayadoo waxbarashada oonleenta ah ay si soconayso maalmaha kale</li> <li>Diirada waxaa la saarayaa kala fogaanshaha dadka, daawaynta jeermiska iyo nadaafada adag</li> <li>Maritda iyo/ama mutadawiciinta looma ogola inay soo galaan dhismaha dugsiga</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ku labaashada waxbarashada tooska ah ee dhammaan ardayda</li> <li>Maritda iyo/ama mutadawiciinta looma ogola inay soo galaan dhismaha dugsiga</li> </ul>

# Aan biloowno!

## **Kulanka Furan ee Dugsiga**

CRCS waxay ka shaqaynaysaa sidii qaab amaan ah loogusoo celin lahaa ardayda iyo qoysaska dugsiga si ay kulan furan uga qayb galaan kahor intaan dugsigu bilaaban.

## **Baahiyaha Aaladaha Casriga ah**

CRCS ayaa masuul ka noqon doonta siinta ardayda aaladaha. Waxaan la xariiri doonaa asbuucyada soo socda waalidiinta si aan u ogaano baahiyaha qoys kasta ee la xariira helitaanka aalad iyo/ama helitaanka internetka.

## **Agabka Dugsiga**

Dhammaan ardayda ayaa u baahan agabka aasaasiga ah ee dugsiga si ay u bilaabaan sanadka, xataa markay oonleen wax ku baranayaan. Qoysaska ayaa la xariiri kara dugsiga haddii cunugoodu u baahan yahay agabka.

## **Xariirka**

Qaabka rasmiga ah ee xariirka ayaa noqon doona Class Dojo iyo fariimaha qoraalka.

## **Xaadirista/Maqnaanshaha**

Xaadirista maalin kasta ayaa laga doonayaa dhammaan ardayda. Xaadirista ardayda ayaa la samayn doonaa maalin kasta ayadoo lagu salaynaayo isdhexgalka maalin kasta ee macalinku la sameeyo ardayga ayadoo ardaygu soo gudbinaayo layli gurigiisa oo lagusoo gudbinaayo hanaanka oonleenka ah. Isdhexgalada u dhaxeeya macalinka iyo ardayga waxaa ku jira: ka qaybgalka fasalka ama wada sheekaysiga muuqaalka ah; iyo/ama wicitaanka taleefanka ardayga, ama ardayda yaryar, la hadlida waalidka.

## **Cuntada iyo Nafaqada**

Cunto ayaa la bixin doonaa inta lagu jiro waxbarashada oonleenka ah. Waxaan hadda ka baaraan dagaynaa dookhyada qaabka ay noqon doonto inta lagu jiro dhawrka bilood ee ugu horeeya dugsiga.